

Dadyowga waddanka u soo guuray kala talinta xiriirka shaqada iyo shaqaaleynta



SAK

Dadyowga waddanka u soo guuray xagga kala talinta xiriirka shaqada iyo shaqaaleynta waa howl, uu qofka waddanka u soo guuray uu war weydiin ka su'aali karo xagga kala talinta xiriirka shaqada iyo shaqaaleynta.

Looyarkaaga ayaa kaa caawin kara tusaale ahaan:

- Haddii aadan fahmin heshiiska shaqada.
- Haddii aad dooneysid, in aad hesho mushaar sax ah.
- Haddii goobtaada shaqada aay ka jirto isdhibaateyn ama takoor, oo aay adigana kugu dhacday.
- Haddii aad dooneysid, in aad su'aashid wax kale oo ku saabsan arrimaha xiriirka shaqada iyo shaqaalaha.

Howlaheenna kaagama gargaari karno shaqo raadin.

Hawshu waa mid u furan dadka oo dhan. La talinta waxaad ku heli finnish ama ingiriis.

Waad joojin kartaa oo ka hortagi kartaa dhibaataada goobta shaqada ka jirta.

Isticmaal liiska kan xasuusta ah:

- 1.** Mar walba samee **heshiis shaqo oo qoraal** ah. Ha saxiixin waraaqaha, haddii aadan fahmin.
- 2.** Adiga waxaad **xaq u leedahay helista tilmaamo iyo haggis**, goorta aad billaabaysid shaqo cusub.

Weeydii waxii talo bixin ah, si geesinimo leh arrimaha goobta shaqada.
- 3.** Raadi **sharuudaha heshiiska shaqada**, kaas oo waqtigiisa uu socdo xagga goobtaada shaqada.

Sharuudaha heshiiska shaqada ayaad ka dheehan doontaa, xaquuqda iyo masuuliyadda saaran qofka shaqaalaha ah.

Haddii goobtaada shaqada ayan laheyn sharuudaha heshiiska shaqada, shaqo bixiyaha waa in uu adeecaa sharciga Finland. Sidoo kale sharciga waxuu sheegayaa xaquuqda iyo masuuliyadda saaran qofka shaqaalaha ah.
- 4.** Waa in aad heshid **resiit mushahar**, mar walba oo aad mushaar heshid. Hubi mar walba, in resiitka mushaarkaaga uu yahay mid sax ah. Resiitks mushaarka waxaa ku xusan cadadka mushaarkaaga, canshuurta iyo waxyaabihii kale ee lagaa gooyay.
- 5.** Haddii aad shaqo sameeysid, sida ku xusan **liiska doorka waqti shaqeedka**, meel wanaagsan ku xafid liiska doorka waqti shaqeedka uu isbeddelo, ku qoro meel xasuus ah isbeddelkaasi dhacay.
- 6.** Kala hadal shaqo bixiyada **cadadka ugu yar ee saacad shaqeedka**, haddii uu shaqobixiyaha uu kuu soo jeediyo 0-heshiis saacadeed. 0-heshiis saacadeed micnaheedu waa, in shaqobixiyaha ayan khasab ku aheyn, in uu ku siiyo saacado shaqo.

Adiga saacadaha ahaqadaada waxaay ahaan karaan 0 - 20 saacadood wiiggiiba. Haddii adiga aay kuu qoron tahay 0 - shaqo saacadeed, waxaa laga yaabaa in aadan helin mushdar. Haddii sharuudaha heshiiska shaqada aay ku xusan tahay saacadaha ugu yar ee la shaqeeyo shaqo bixiyada waa in uu ku siiyaa ugu yaraan cadadkaasi saacado shaqeedka.
- 7.** Haddii xiriirka heshiiska shaqo uu dhammaado, ku dadaal in aad heshid **gunnooyinka fasaxa** ee saxda ah. Waxaad heleysaa gunno fasaxeed, hadduu aadan qaadan gabi ahaan maalmo fasaxeedkaaga. Gunnooyinka fasaxa waxaad ka dheehan kartaa resiitka mushaarka.
- 8.** Markuu xiriirka heshiiska shaqada kaa dhammaato, ka codso marwalba **shahaadada shaqada**.
- 9.** Baro goobtaadashaqada **qofka sida rasmiga loo doortay**. Qofkaasi waxuu qaabilsan yahay arimaha shaqaalaha oo kala shaqeeyaa shaqo bixiyaha. Qofka sida rasmiga ah loo doortay, wuxuu ka caawiyaa shaqaalaha aay dhibaataada ka heeysato shaqobixiyaha.
- 10.** Kubiir **uurka shaqaalaha**. Ururka shaqaalaha waa urur oo aay ka wada tirsan yihiin shaqaalaha isku wada xirfadaha ah. Ururka shaqaalaha waxeey kala hadlaan shaqo bixiyahooda, noocyada shuruudaha shaqo.

Warbixin dheeraad ah kala xiriir: www.sak.fi/toissasuomessa



E-mailka waa:

workinfinland@sak.fi



Dadyowga waddanka u soo guuray katalinta xagga xiriirka shaqada telefoon lambarkeeda waa:

0800 414 004

Teleefanka waa lacag la'aan. Telefoonka operaytarkaaga oo aad ka wacdo waxuu kaa qaadan qarashka telefoonka caadiga ah.

Faycsbuugga waad naga heli:
[facebook.com/atworkinfinland](https://www.facebook.com/atworkinfinland)

SAK



Vipuvoimaa
EU:lta
2014-2020